

JAMHUURIYADDA SOMAII LAND
GOLAH A WAKIILADA



**XEERKA XADAYNTA MUSHAHAAROOYINKA
IYO GUNOOYINKA MADAXWEYNAHA,
MADAXWEYNE KU-XIGEENKA IYO
MUDANAYAASHA GOLAYAASHA
XEERDEJINTA (GUURTIDA IYO WAKIILADA).**

11/25/2010

REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENT

REF.JSL/M/XM/249-368/022011

DATE13/02/11.....

XEER MADAXWEYNE No: 0113/022011

DHAQAN-GALKA XEER LR. 46/2010

XEERKA KALA XADAYNTA MUSHAHAROYINKA, GUNOOYINKA
MADAXWEYNNAHA IYO MADAXWEYNE KU-XIGEENKA IYO
MUDANAYAASHA XEER DEJINTA

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Ogolaanshaha Golaha Wasiirada ee Xeer Lr. 46/2010,

Markuu Arkay: Qodobka 90^{aad} ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland,

Markuu Helay: Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee ku suntan GW/Kf-QC10/508/2011 ee 10/02/2011 ee Xeerkala Xadaynta Mushaharooyinka, Gunoooyinka Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka iyo Mudanayaasha Xeer Dejinta Xeer Lr. 46/2010,

Markuu Arkay: Qodobka 75^{aad} ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

Wuxuu Soo Saaray

Dhaqan-galka Xeer Lr. 46/2010 ee Xeerkala Xadaynta Mushaharooyinka, Gunoooyinka Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka iyo Mudanayaasha Xeer Dejinta.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Diiwangelya
Neer
15.2.2011



Ref: Gw/KF-14/508/2011

Date : 05/02/2011

GO'AANKA ANSIXINTA XEERKA KALA XADAYNTA MUSHAHARADA

GOLAH WAKILADA JSL

Markuu arkay: Ahmiyada Balaadhan ee uu Xeerkani u Leeyahay dalka.

Markuu ogaaday: In aanu jirin xeer hore oo loo raaca Mushahaarooyinka ay qaataan Masuuliyinta Qaranka ayna waajib distuuri ah tahay dejinta soo saarida xeerkani sida ku cad dastuurka qaranka qodobkiisa **47^{aad}, 65^{aad} & 87^{aad}**

Markuu tixgeliyey: Duruufaha Dhaqaale ee dalka, loona baahan yahay in la isku filaysiyo dhaqaalaha kooban ee dalka.

Markuu Aqoonsaday: In Nuxurka xeerkani xambarsanyahy uu yahay Muuqaal cad iyo Xisaab cad.

Markuu u Codeeyay: xeerka kala xadaynta Mushahaarooyinka Madaxwaynaha Madaxwayne ku xigeenka iyo Baarlamanka ,ka **kal-fadhigii 14^{aad}** ee **caadiga ahaa** fadhiisi **5aad ee 05/02/2011** oo ay goob jog ahaayeen **47**mudane oo ka mida mudanayaasha Golaha Wakilada

WUXUU

Cod aqlabiyyad ah (**45cod**) shan iyo afartan oo gacan taag ah ku ansixiyey halka (**1**) hal Mudane ka aamusay, Gudoomiyuhuna muu codayn sida caadada u ah.

C/risaaq Siciid Ayaanle.

Xog.Guud ee G/Wakiilada JSL



C/Casiis Maxamed Samaale

K/S Gudoomiyaha Golaha Wakilada

AhnaGudoomiye ku Xigeenka 1aad

**XEERKA XADAYNTA MUSHAHAROOYINKA IYO GUNOOYINKA
MADAXWEYNAHA, MADAXWEYNE
KU-XIGEENKA IYO MUDANAYAASHA GOLAYAASHA XEERDEJINTA
(GUURTIDA IYO WAKIILADA).**



(Xeer No: 46/2010)

Golaha Wakiiladu:

- Markuu arkay:** Ahmiyada Balaadhan ee uu Xeerkani u Leeyahay dalka.
- Markuu ogaaday:** In aanu jirin xeer hore oo loo raacaan Mushahaarooyinka ay qaataan Masuulayiinta Qaranka ayna waajib distuuri ah tahay dejinta soo saarida xeerkani sida ku cad dastuurka qaranka qodobkiisa 47,65 & 87
- Markuu tixgeliyey:** Duruufaha Dhaqaale ee dalka, loona baahan yahay in la isku filaysiiyo dhaqaalaha kooban ee dalka.
- Markuu Aqoonsaday:** In Nuxurka xeerkani xambarsanyah u yahay Muuqaal cad iyo Xisaab cad.
- Markuu arkay:** Qod: 47, 65, 87, Dastuurka JSL

**WUXUU ANSAXIYEY XEERKAN XADAYNTA MUSHAHAROOYINKA IYO
GUNNOOYINKA MADAXWEYNAHA, MADAXWEYNE KU XIGEENKA IYO
MUDANAYAASHA GOLAYAASHA XEERDEJINTA(GUURTIDA IYO
WAKIILADA).**



XUBINTA KOWAAD
TILMAANTA GUUD

QODOBKA 1aad:
EREY BIXINTA.

1. **Madaxweyne:** Waxaa Loola Jeedaa masuulka ay ummadu u dooratay Madaxweynaha qaranka, muddada uu xilka hayo.
2. **Madaxweyne Ku xigeen:** Waxaa Looga jeedaa: Masuulka ay ummadu u dooratay Madaxweyne ku xigeenka qaranka, mudada uu xilka hayo.
3. **Gudoomiye:** waxaa loola jeedaa labada gudoomiye ee Golayaasha Xeer dejinta (Guurtida iyo Wakiilada).
4. **Gudoomiye ku-xigeeno:** waxaa loola jeedaa afarta Gudoomiye ku xigeen ee labada Gole.
5. **Mudane:** waxaa loola jeedaa xildhibaanada labada Gole ee xeerdejinta umadu u dooratay ama u xulatay golayaasha xeer dejinta.
6. **Xubin sharaf:** waxaa loola jeedaa xubno sharafyada golaha guurtida ku jira ee dastuurka qaranku cadeeyay ee aan codka lahayn.
7. **Mushahar:** waxaa loola jeedaa qadar lacag ah oo uu qofku ku qaato shaqo cayiman oo uu qabto mudo xadidan.
8. **Gunno:** waxaa loola jeedaa qadar lacag ah oo uu qofku ku mutaysto masuuliyad, hawl, duruuf ama baahi gaar ah ama guud taas oo ku xadidan mas'uliyad ama xil, ama hawl ka dheeri ah mushaharka ama iskeed u taagan.
9. **Kharash Hawleed:** waxaa loola jeedaa kharashyada iyo xisaabaadka ay ku shaqaynayaan Madaxweynaha iyo madaxweyne ku-xigeenku iyo golayaasha xeer dejintu ee ku cadaan doona miisaaniyad sanadeedka qaranka kana baxsan xeerkan.



**QODOBKA 2aad
MAGACA XEERKA.**

Xeerka waxaa lagu magacaabayaa xeerka xadaynta mushaharooyinka iyo gunnooyinka madaxweynaha, madaxweyne ku xigeenka iyo mudanayaasha Golayaasha xeerdejinta (guurtida iyo wakiilada).

**QODOBKA 3aad
UJEEDOOYINKA XEERKA.**

Xeerkana ujeedooyinkiisa waxaa kamid ah oo ugu muhiimsan:

1. In la dhamaystiro xeerarka ka dheegmaya dastuurka jamhuuriyada somaliland ee ay waajib tahay meal marintisu gaar ahaan qodobada 47,65, iyo 87 ee dastuurka.
2. In la xoojiyo la xisaabtanka iyo mugdi ka saarka maamul dawlaadeedka hantida qaranka jamhuuriya somaliland(accountability and transparency) si loo gaadho maamul wanaag dawladnimo(good governance).

**XUBINTA LABAAD
XADAYNTA MUSHAHAROYINKA IYO GUNNOOYINKA.**

QODOBKA 4aad.

Madaxweynaha, ku-xigeenka madaxweynaha iyo mudanayaasha golayaasha xeer dejinta (guurtida iyo wakiilada) waxay xaq u leeyihiin mushahar iyo gunnooyin joogto ah oo bil leh ah.

**QODOBKA 5aad.
MUSHAHARKA GUNNOOYINKA MADAXWEYNHA IYO KU XIGEENKIISA.**

Madaweynaha iyo ku xigeenkiisa waxaa xeerkani u xadaynayaa mushaharooyinka iyo gunnooyinka kala ah:

1.A) Mushaharka madaweynaha bishiiba wuxuu noqonayaa bishiiba sl. Sh. 45,500,000

1.b) gunnada xilka ee madaxweynuhu waxay noqonaysaa bishiiba sl. Sh. 22,750,000
Isugayn guud sl. Sh. 68,250,000

2.A) Mushaharka ku-xigeenka madaxweynahu wuxuu noqonayaa bishiiba sl. Sh. 32,500,000

2.B) gunnada xilka ku-xigeenka madaxweynuhu waxay noqonaysaa bishiiba sl. Sh. 16,250,000
Isu gayn guud sl. Sh. 48,750,000



**QODOBKA 6aad
KHARASH HAWLEEDKA.**

Hantida dawlada iyo kharashka maamul siyaasadeedka (political fund) ee ay ku shaqaynayaan kuna dhaqmayaan, hawlaho qarankana ku fulinayaan madaxweynaha iyo ku madaxweyne ku xigeenkiisu ee ka baxsan mushaharka iyo gunnooyinka lagu sheegay xeerkan waxaa lagu cadaynayaa miisaaniyad sanadeedka qaranka jamhuuriyada somaliland.

**QODOBKA 7aad
MUSHAHARKA IYO GUNNOOYINKA GOLAYAASHA XEER DEJINTA.**

Xadaynta mushaharooyinka iyo gunnooyinka mudanayaasha golayaasha xeer dejinta (guurtida iyo wakiilada) wuxuu noqonayaa sida tan:

- | | |
|---|--------------------------|
| 1.A) Guddoomiyaha golaha guurtidu mushaharkiisu wuxuu noqonayaa bishiiba | Sl.sh. 6,500,000 |
| 1.B) Guddoomiyaha golaha guurtidu wuxuu yeelanayaa gunno xil bishiiba | sl.sh.3,250,000 |
| 1C) Guddoomiyaha golaha guurtidu wuxuu yeelanayaa gunno guri bishiiba | <u>sl.sh. 3,250,000</u> |
| Isugayn guud | sl.sh. 13,000,000 |
| 2A) Guddoomiyaha golaha wakiiladu mushaharkiisu wuxuu noqonayaa bishiiba | sl.sh. 6,500,000 |
| 2.B) Guddoomiyaha golaha wakiiladu wuxuu yeelanayaa gunno xil bishiiba | sl.sh. 3,250,000 |
| 2.C) Guddoomiyaha golaha wakiiladu wuxuu yeelanayaa gunno guri bishiiba | <u>sl.sh. 3,250,000</u> |
| Isugayn guud | sl.sh. 13,000,000 |
| 3.A) Afarta guddoomiye ku xigeeen ee golayaasha xeer dejinta (guurtida iyo wakiilada) midkasta wuxuu yeelanayaa mushahar bishiiba | sl.sh. 6,500,000 |
| 3.B) Afarta Guddoomiye ku xigeeen ee kor ku xusani wuxuu yeelanaya mid kastaa Gunno xil bishiiba | sl.sh. 1,950,000 |
| 3.C) midkastaa waxa uu yeelanayaa Gunno guri bishiiba | <u>sl.sh. 1,950,000</u> |
| Isu gayn midkastaa wuxuu yeelanayaa bishiiba | sl.sh. 10,400,000 |



**QODOBKA 8aad
MUDANAYAASHA XEER DEJINTA.**

Mudanayaasha golayaasha xeer dejinta (guurtida iyo wakiilada) mudane kastaa wuxuu yeelanayaa.

- | | |
|--|------------------|
| a) Mushahar dhan bishiiba | sl.sh. 6,500,000 |
| b) Gunno guri oo dhan bishiiba | sl.sh. 1,625,000 |
| Isu gayn mudane kastaa wuxuu yeelanayaa bishiiba sl.sh. 8,125,000 | |

QODOBKA 9aad

XUBIN SHARAF.

Xubno sharafeed yada golaha guurtida ku jira ee dastuurka qaranku cadeeyay waxa ay la xuquuq yihin mushahar iyo gunno ba mudanayaasha xeer dejinta ee golaha guurtida.

**XUBINTA SADDEXAAD
QODOBO GUUD**

**QODOBKA 10aad
DIB U-EEGISTA XEERKA.**

Mushaharooyinka iyo gunnooyinka uu xeerkani dhigayo waxaa uu golaha wakiilladu dib u-eegis ku samaynayaa mar kasta oo loo baahdo, iyada oo la waafajinayo hadba xadiga dhaqaalaha dalka iyo nolosha bulshada.

**QODOBKA 11aad
DHAQANGALKA XEERKA.**

Xeerkani wuxuu dhaqangalayaa marka golaha wakiilladu ansixyo, madaxweynuhuna saxeexo.

C/risaaq Siciid Ayaaale
Xog. Guud ee golaha wakiilada



C/easiis Maxamed Samaale
K/S Gudoomiyaha Golaha Wakiilada
Ahna Gudoomiye K/Xigeenka 1aad